

# Shuruuradaha U qalmitaanka Cuntada Asaasiga ah: Waxa aad u Baahantahay inaad Oggaatid si aad u Haysatid Dheefahaaga

## Basic Food Eligibility Requirements: What You Need to Know to Keep Your Benefits

### Dheefahaaga waa kuwo kuxadidan waqtii haddii aadan shaqaynayn.

Waxaan kuu tixgelinaynaa in aad tahay Qofka Wayn ee Awooda Jireed Leh Ee aan haysan Ku-tiirsanayaal (ABAWD) ee loogu talogalay Cuntada Aasaasiga ah sababtoo ah adiga waxaad awoodaa in aad shaqaysid wax carruur ahna gurigaaga kuma haysatid,

Waxaad qaadan kartaa dheefaha Cuntada Aasaasiga ah seddex jeer 36-dii billoodba haddii aadan kasoo bixin shuruudaha shaqada.

### Siddee loo haysanayaa dheefahaaga cuntada aasaasiga ah

Waa in aad samaysid hal ama ka baddan oo hawlaan soo socda kamid ah si aad u haysatid dheefahaaga wax ka baddan seddex bilood:

- Ka buuxi ama ka dhammee shaqada iskaada ah tooska barnamijka shaqada kumeel gaarka ah bil kasta. Tirada dheeftaada bilaha ah waxay xadidaysaa tirada saacadaha ay khasab tahay in aad samaysid shaqada iskaada ah si aad u haysatid dheefahaaga cuntada.
- Shaqee ugu yaraan 20 saacadood todobaadkii ama 80 saacadood dhexdhedaadkii bishii.
- Kaqayb gal shaqaalaynta gobolka la oggolaaday ama barnamijka tababarka sida:
  - Shaqaalaynta Cuntada Aasaasiga ah iyo Tababarka (BFET). Wixii macluumaad dherei ah waxaad gashaa boggaan internetka: [www.dshs.wa.gov/bfet](http://www.dshs.wa.gov/bfet);
  - Barnamijyada waxaa lagu daray Hal-Abuurka Awooda shaqada iyo Qaunuunka Fursada (WIOA). Wixii macluumaad dherei ah waxaad gashaa boggaan internetka <https://www.dshs.wa.gov/esa/community-services-offices/wioa>; ama
  - AmeriCorps VISTA.

### Caqabadaha hortaaqan kaqayb qalka

Nala soo xiriir haddii aadan awoodin in aad kaqayb qaadatid ugu yaraan 80 saacadood bishii sababtoo ah adiga:

- Waxaad tahay qof jir ahaan ama maskax ahaan naafu u ah;
- Waxaad qaadataa dheefaha ka ahaada Shaqo iyo Warshado (L&I), Maamulka Halyeyyada hore, ama caymis naafonimo khaas ah;
- Aad ku nooshahay xaalad caqabad ku noqonaysa in aad shaqayso;
- Waxaad daryeeshaa qof aanan asagu nafsadiisu daryeli karin da' ama naafonimo darteeda;
- Waxaad kaqayb qaadataa daawayn ku tiirsanaan daroogo ama barnamij baxnaanis;
- Waxaad codsatay ama qaadataa dheefaha shaqo la'aanta;
- Waxaad ku qorantahay iskuul ugu yaraan maalinta-barkeeda ah; ama
- Waxaad qaadataa dheefaha Caawimaada Lacagta caddaanka ah ee Qaxootida ama Lacago Deeq U Dhigma; ama
- Waxaad ka qaybqaadataa Dhabbaha LEP ama barnamijka CLEVER.

### Waxyaabaha ay tahay in aad soo sheegtid

Waa in aad noo soo sheegtid haddii:

- Aadan dhammayn karin tirada saacadaha kaqayb gal ka bishii.
- Ay shaqadaadu ka hoos marto 20 saacadood todobaadkii.
- Dakhliga qoyska reerkaaga soo galaya wuu ka baddan yahay xadka ku qoran WAC 388-478-0060.
- Adiga ama xubin ka tirsan reerkaaga aad heshaan bakhtiyaa-nasiib nacfi leh ama aad ku guulaysataan khamaar hal ciyaar oo u dhiganta ama ka badan xadka ku xusan xeerka WAC 388-470-0006(8)(a).

Waxaad ka heli kartaa macluumaad baddan oo kusaabsan shuruudaha Qofka Wayn ee Awooda Jireed Leh Ee aan haysan Ku-tiirsanayaal boggaan internetka ah [www.dshs.wa.gov/abawd](http://www.dshs.wa.gov/abawd).

Naga soo wac lambarkan 1-877-501-2233 haddii aad qabtid su'aalo, u baahantahay caawimaad laguugu xiro barnamijka tababarka, ama u baahantahay in aad soo sheegtid isbedelo.

Waxaad naga soo booqan kartaa boggaan internetka ah [www.washingtonconnection.org](http://www.washingtonconnection.org) si aad u codsatid dheefaha, usoo dirtid muraajacada, ama usoo sheegtid isbedelada.